



- Telefon24 -

Taleefoonka wargelinta ka maqnaanshada awgeed la adeegsado af soomaali

Warbixin ku saabsan (Telefon24)

Waayahan dambe waxaa la heli kara adeegga loo yaqaanno (Telefon24). Kaasoo ah adeeg taleefoon loogu talagalay dugsiga (Skola24). Qofka waalidka ah oo doonaayo in dugsiga uu wargeliyo ka maqnaanshada ubadkiisa/carruurtiisa wuxuu adeegsan kara taleefoonkaas. Ku isticmaalida adeegga (Skola24) u ma baahna inaad yeelato lambar u gaar ah (föräldrakonto). Waxa kaliya ee aad u baahan tahay waa qalabka taleefanka casriga ah ee loo yaqaanno (knapptelefon).

Mid kamid ah luqooyinka hoos ku xusan ayaa wargelinta ka maqnaanshada awgeed adeegsan karta:

0515 777 000	Af iswiidish
0515 777 001	Af ingriisi
0515 777 002	Af carabi
0515 777 003	Af soomaali
0515 777 004	Af baashto
0515 777 005	Af albaani

Adigoo adeegsanaayo qalabka taleefoonka haddii aad garaacdo tobbanka lambar ee aqoonsiga (personnumret) ee ubadkaaga, waxaa wargelinta laga diiwangelinayaa keyda kombyuutarka ee dugsiga. Sidaas awgeed, hawlwadenehada dugsiga u ma baahna in hawlgal gaar ah ay ku dhaqaaqaan. Haddii wargelinta ka maqnaanshada ay ku saabsan tahay isla maalintaas, waa in wargelinta la hela horranta 12.00 galinga hore.

Wargelinta ka maqnaanshada waxaa haatan lagu dhaqaaqi kara kolba hal maalin. Haddii waalidku u soo waco daqiiqadaha/saacadaha ku xiga 12.00 (duhurnimo) waxaa wargelintaas la diiwangelin doona maalinta ku xigta.

Qofku isagoo taleefoonka wargelinta ku hadlaayo ayuu joojin kara. Diiwangelinta kadib waxaa qofka la siinayaa xaqiijin. Haddiise qofku xaqiijinta horranteeda uu taleefoonka dhigo, xaaladaas diiwangelin suurtagal ma noqon doonto.

10 lambar aqoonsiga (personnummer) ee ardayga waa in hab sax ah loo diiwan geliyaa.

Waalidiinta qabo muftaaxa keydka kombyuutarka ee (Skola24) lagu galo (inloggningskonto), waxay indhahooda ku dhufan doonaan wargelinta ka maqnaanshada oo goobabin saaran, goobta warbixinta faahfaahsan lagu qoro, oona wehliso lambarka taleefanka la adeegsado. Nidaamkan waxaa ka reeban haddii wargelinta ka maqnaanshada laga soo waco taleefoon leh lambar qarsoodi ah ama shirkad lambarkooda aanan muuqan.

Hawlwadenehada dugsiga waxay ogaan karaan saacadda diiwangelinta iyo lambarka taleefoonka diiwangelinta laga helay. Macallinka ardayga wuxuu warbixinta helayaa markii uu booqdo keydka kombyuutarka ee (Skola24).



- Telefon24 -

Taleefoonka wargelinta ka maqnaanshada awgeed la adeegsado af soomaali

Warbixin ku saabsan sida (Telefon24) loogu isticmaalo

Ku soo-dhowaada warbixintaan af soomaaliga ku qoran ee ku saabsan sida loogu isticmaalo adeegga taleefoonka ee loogu talagalay wargelinta ka maqnaanshada, adigoo adeegsanaayo qalabka taleefanka loo yaqaanno (knapptelefon). Waa adeeg diyaarsan oo imminka la adeegsan karo.

Lambarka taleefoonka oo aad adeegsan kartaan waa **0515-777 003**.

- Markii lambarka aad garaacdaan farintaan ayaa la idinku soo dhowayn doona:
"Waa salaaman tihiin, ku soo dhowaada keydka kombyuutarka ka maqnaanshada

(Skola24) ee magallowaynta (Malmö stad). Saacadu haatan waa horranta 12.00 saac, waxaan diiwangelin doona ka maqnaanshada maanta.

(Ama. Saacaddu way ka badan tahay 12.00 saac (duhurnimo), sidaas awgeed ka maqnaanshada berito ayaa loo diiwangelin doona.)

Fadlan garac 10 lambar aqoonsiga ee ardayga."

Markii diiwangelinta ay dhamaato, codka taleefoonka ayaaa xaqiijin ku siin doono:

"Wargelinta ka maqnaanshada imminka waa la diiwangeliyay. Ha iloowin in aad maalin kasta ka maqnaanshada wargelisa. Waad ku mahadsan tahay wargelinta."

Ka feker in!

- Aad diyaarsato tobanka lambar aqoonsiga ee ubadkaaga.
- Wargelinta ka maqnaanshada kolba hal maalin ayaa lagu dhaqaaqi kara. Sidaas awgeed, waa in maalin kasta aad ka maqnaanshada ubadkaaga wargelisa. Teeda kale, ha iloowin inaad horranta 12.00 duhurnimo wargelintaada la hela, waa haddii wargelinta ay isla maalintaas ku saabsan tahay. Haddii aad soo wacdo daqiiqadaha/saacadaha 12.00 duhurnimo ku xiga, waxaa wargelintaada la diiwangelin doona maalinta ku xigta.
- Qofku isagoo taleefoonka wargelinta ku hadlaayo ayuu joojin kara. Diiwangelinta kadib waxaa qofka la siinayaa xaqiijin. Haddiise qofku xaqiijinta horranteeda uu taleefoonka dhigo, xaaladaas diiwangelin suurtagal ma noqon doonto.



- Telefon24 -

Taleefoonka wargelinta ka maqnaanshada awgeed la adeegsado

Taleefoonka (Telefon24) tusmo awgeed loogu talagalay

Waxaa jiro lambar taleefoon tusmo awgeed loogu talagalay. Tasmada waa af iswiidish.
Wac: 0515-777629

Tusmo ahaan diiwangeli ka maqnaanshada ardayga 10 lambar aqoonsiga ah: 112233-1232
ama 112244-1239

Tusaaleha masawirka macallinka u muuqan doono waa sidatan:

Visa översikter för:

Översikt: Frånvarande mentorselever idag (0st)

Översikt: Frånvarande elever på mina lektioner idag, (1st)

En, 08:20-09:30, - 1 frånvarande elev

Namn	Klass	Frånvaro	Anledning	Kommentar
Svensson, Hanna	9A	70min	Anmäld	Inringt 2007-08-07 (11:01) av: 0515777888